

Guudmarka Natijjada Wada Shaqaynta Rainier Valley

Natijjooyinka Wada Shaqaynta Bulshada

Dadaalka wacyi gelinta ee lagu uruurinayo maclummaadka barnaamijka hordhaca ah ee loogu wareegaya 12 Sound Transit goobood oo ku garab yaala tareenka gudud ee Link ee Rainier Valley ee Xafiiska Seattle ee Guryaynta (Seattle Office of Housing) ee kordhinta fursahada mulkiyada guryaha rasmiga ah oo jaban. Gaar ahaan, dadaalkeena natijjada waxaa lagu doonayaajawaab celinta:

- Taageerada bulshada ee natijjooyinka mulkiyada guryaha jaban ee goob kasta ee la isla eegaya.
- Mudhaanta goobaha ee marka kowaad ee la sameeyo.
- Doorbiditaanka cufka (wadarta tirada guryaha goob kasta ku yaala) marka loo eego cabirka guriga (tirada xubnaha qoyska ee guriga kastaa uu qaadi karo).
- Kala doorashada u adeegsiga meelaha aan loo samaynin in la dago tukaano ama xarun bulsho oo markaa ay adeegsan karaan.

Jawaab celinta laga heley kulamada bulshada ee bartilmaameedka, xog uruurinta, dhacdooyinka shacabka iyo maclummaadka iimeelka/taleefanka ee dhawrka barnaamij ee caamka ah, oo ay ku jiraan:

- Taageerada balaadhan ee loo isticmaalayo goobta ee lagu abuurayo meelo la awoodo, guryo la yeelanayo oo tareenka laga tagi karo.
- Rabitaanka lagu hormarinayo qaabiliaada tirada faraha badan ee guriga kowaad, iyo rabitaanka gaarka ah ee goobta 1 iyo 6.
- Rabitaanka qaabiliaada ee kala duwan ee cabirka guryaynta ee goobaha.
- Mudnaanta in laga siiyo xawaarahaa in la awoodi karo oo markaa la sameeyo.
- Rabitaanka in laga jaro meelaha aan la degi karin ee dhaqanka iyo/ama isticmaalka bulshooyinka ama ganacsiyada dadka deegaanku leeyihii.

Waxaa jira waxyeebo ka duwan oo aanu ku maqalnay kulamadeena bulshada kuwaas oo marka gaadhaya kooxaha aan marka hore la matali jirin marka hore, iyo xog uruurinta, kuwaas oo markaa ka qayb galkooda ay adag tahay in la ogaado sida dadka midabka ah, Dadka Ingiriisigoodu Xadidan Yahay ama dakhligoodu hooseeyo. Wuxuu kowaad ee ay ku kala duwan yihiin waxay ahaayeen:

- Cida kasoo qayb gashay kulmadaha bulshada kuwaas oo markaa u badnaa inay doorbidaan in guryuhu ay yeeshaan hurdooyin badan si markaa ay u qaadi karaan qoysas balaadhan, halka cida ka jawaabaysa xog uruurinta ay u badan yahay inay mudnaanta siyyaan in la badiyo tirada guryaha goobtiiba ku yaala.
- Kulamada bulshada cida ka qayb gashay waxa ay u badan tahay inay doorbidaan Goobta 12, halka dadka xog uruurinta ka jawaabayay ay u badan yahay inay doorbidaan Goobta 3. (Cida ka jawaabaysa xog uruurintu waxa ay si wayn mudnaanta u siinaysaa tirada guryaha ay goobtu qaadi karto, halka dad ka qayb geley kulanku ay doorbidaayaan meelaha aan la degaynin ee qiimaha badan).
- Kulamada bulshada dadka ka qayb geley waxa ay u badan tahay inay ka hadlaan walaacyada deegaanka iyo/ama bulshada ee sida, inay doonayaan in guryuhu wax ribo ah ayna yeelan iyo inay bixiyaan adeegyada dhaqanka waafaqsan ee meelaha aan la dagaynin laga heli karo

Hirgelinta Jawaabcelinta

Sound Transit iyo Xafiiska Seattle ee Guryaynta (Seattle Office of Housing) waxa ay qaadayaan dhawr talaalo oo markaaba ah kuwaas oo ku salaysan jawaab celinta bulshada taas oo markaa ah dadaalka wacyi gelinta, oo ay ku jiraan:

- Soo dhigitaanka warbixinta websaytka Sound Transit, iyo u dirista kooxda SouthCORE kuwaas oo markaa laga heley jawaab celin iyo dhinacyada kale ee markaa danaynaya.
- Qabashada kulamada la socodka ee kooxda kuwaas oo markaa lagu ogaado arrimaha taagan ee loo baahan yahay in la xaliyo (tusaale ahaan, rabitaanka St. Michael in laga midho dhaliyo natijada faa'idada leh ee Goobta 6).
- In la qoro heshiis u dhaxeeya Sound Transit iyo Xafiiska Seattle ee Guryaynta (Seattle Office of Housing) oo ay ka muuqato mudnaanta bulshadu.

In barnaamijyadan laga soo wareejiyo Sound Transit loona wareejinayo Xafiiska Seattle ee Guryaynta (Seattle Office of Housing) taas oo markaa ujeedadiisu tahay in la dhiso guryo jaban kuwaas oo markaa uu ku saabsanaan doono Heshiiska Isfahanka (Memorandum of Understanding), kaas oo markaa guriga iyo duqa maqaalagu ansixin doonaan. Waxaa laga qaadanayaa macluumaadka bulshada, Heshiiska Isfahanka (Memorandum of Understanding, MOU) waxa ka muuqan doona mudnaanaha muhiimka ah ee ka wareejinta guryaha Sound Transit oo lagu wareejinayo Xafiiska Seattle ee Guryaynta (Seattle Office of Housing), iyo dalabka qorshe hawleedka ee dhismaha goobta. Heshiisyada iyo dalabyada qorshaha waxaa ka muuqan doona mudnaanaha bulshada ee soo socda:

- **Goobta 1 inay kamid noqoto goobaha wajiga hore la dhisayo.** Goobta 6, mudnaanta labaad, waxa ay u baahan tahay wada shaqayn dheeraad ah oo la xidhiidhka isticmaalka hore ee St. Michael ee baarkinka goobta.
- **Qorshayaasha ay ku jiraan guryaha cabirka qoyska ee goobahan.** Qiimayta shuruudaha waxaa la siin doonaa doorbiditaan mashaariicda lagu taliyay ah taas oo markaa qaabileysa dhamaan qoysaska afarta xubnood ama wax ka badan, oo markaa lagu xoojiyo guryo kala cabir duwan oo isku jira.
- **Fursadaha lagu kordhinayo qiimo jabnaanta.** Xafiiska Seattle ee Guryaynta (Seattle Office of Housing) waxa uu doonayaa inuu yeesho khayraad deeq lacageed oo deegaanka ah oo gobolk ah, federalka iyo lacag gaar ah si markaa guryahan ay u suurto geli karto inay jabnaadaan ilaa inta macquulka ah.
- **La shaqaynta shirkadaha dhismaha si markaa loo fududeeyo xidhiidhka hay'ada bulshada iyo ganacsiyada deegaanka ee markaa meel ay meherado ka dhigtaan doon doonaya.** Xafiiska Seattle ee Guryaynta (Seattle Office of Housing) waxa ay la shaqayn doontaa Office of Economic Development, Business Impact NW, hay'adaha xubnaha ka ah SouthCORE iyo kuwa kale si ay u sameeyaan xidhiidh kaas oo markaa horseedi kara kulamada mudnaanaha ee bulshada, oo ay ku jiraan ganacsiyada gaarka loo leeyahay ee deegaanka, xarumaha daryeelka ilmaha iyo meelaha dhaqanka.